# KA CODEYNTA ALBERTA DOORASHOOYINKA GOBALKA

# SOOMAALI

| | |
|---|---|
| English | English |
| French | Français |
| Blackfoot | Siksikatsipowahsin |
| Dene | Denesųłıne |
| Michif | Michif |
| Plains Cree | nehiyawak |
| Stoney/Nakoda/Sioux | Îethka |
| Woods Cree | Sakawiyniw pekikskweywin |
| Arabic | العربية |
| Chinese (Simplified) | 简体中文 |
| Chinese (Traditional) | 繁體中文 |
| Dutch | Nederlands |
| Farsi | فارسی |
| German | Deutsch |
| Hindi | हिंदी |
| Italian | Italiano |
| Korean | 한국어 |
| Polish | Polski |
| Punjabi | ਪੰਜਾਬੀ |
| Russian | Русский |
| Somali | Soomaali |
| Spanish | Español |
| Tagalog | Tagalog |
| Tigrinya | ትግርኛ |
| Ukrainian | Українська |
| Urdu | اردو |
| Vietnamese | Tiếng Việt |

# SHURUUDAHA

## Waa inaad:








- tahay Muwaadin Canadian ah
- Jirto 18+, aadna
- ku nooshahay Alberta

# ISDIIWAANGELINTA

**Si aad u codeyso, waa inaad isdiiwaangeliso. Qaab hordhac ah ayaad isku diiwaangelin kartaa ama waxaad iska diiwaangelin kartaa goobta cod bixinta.**

## *Dookha 1 aad – Hordhaca:*




**Oonleenka – voterlink.ab.ca**

**Isticmaal Ruqsadaada Darawalnimada Alberta ama Kaarka Aqoonsiga Alberta si aad u gasho barta.**

**Haddii aadan haysan Aqoonsigaan, wac 1-877-422-8683.**

## *Dookha 2 aad – Iska Diiwaangelinta Goobta Cod bixinta:*



**Marka aad aado goobta si aad u codeyso**

**Waa inaad na tusmo dukumiintiyadaada oo ay ku qoran yihiin**

- **Magacaaga oo buuxa, iyo**
- **Ciwaanka meesha aad hadda ku nooshahay**

**Sidoo kale waxaad u baahan doontaa inaad saxiixdo foom aad ku sheegeyso inaad tahay cod bixiye u qalma inuu cod dhiibto.**

**Fiiri bogga xiga si aad u oggaato Aqoonsiyada aan aqbalno.**

# AQOONSIGA

**Si aad u cadeyso aqoonsigaaga, waa inaad muujiso ugu yaraan hal dukumiinti oo ah aqoonsi ay dawladu bixisay oo sawir leh.**

**Haddii aysan macquul ahayn, waa inaad keento labo dukumiinti oo aqoonsiyo ah intaas badelkeeda. Laakiin, labada dukumiintiba waa inuu ku qoran yahay magacaaga oo buuxa hal dukumiintina waa inuu muujinaayo ciwaanka meesha aad hadda ku nooshahay oo sax ah.**

**Haddii aadan gabi ahaanba haysan wax aqoonsi ah, qof kale ayaa damaanad kaa noqon kara. Nala soo xariir si aad u oggaato xog badan oo ku saabsan hawshaan.**

## Tusaalayaasha Aqoonsiyada Muujiya magaca:




## Tusaalayaasha Aqoonsiga Muujiya magaca iyo ciwaanka:




Liiska oo buuxa waxaa laga heli karaa barta oonleenka ah ee
[elections.ab.ca/voters/id-required-to-vote/](elections.ab.ca/voters/id-required-to-vote/)

# DOOKHYADA COD BIXINTA

## *Maalinta Doorashada*




- **Cod bixintu waxay ka dhacaysaa dugsigaaga maxaliga ah, kaniisada, ama hoolka bulshada**
- **Dhammaan goobaha cod bixinta waxay furmayaan 9:00 subaxnimo illaa 8:00 habeenimo**
- **Waxaa laga yaabaa inaad ka codeyn karto goobta cod bixintaada oo kaliya**

## *Cod bixinta Hordhaca ah*




- **Cod bixintu waxay ka dhacdaa meelaha u dhaw suuqyada, maktabadaha, ama jaamacadaha**
- **Inta badan goobaha cod bixinta waxay furan yihiin inta u dhaxeysa 9:00 subaxnimo ilaa 8:00 habeenimo, laakiin saacaha way kaladuwanaan karaan**
- **Waxaad codkaaga ka dhiiban kartaa goob kasta oo laga sameynaayo cod bixinta hordhaca ah ood doorato**
- **Waxay soconeysaa Talaadada illaa Sabtida asbuuca ka horeeya Maalinta Doorashada**

## *Cod bixinta Qaaska ah*




- **Cod bixintu waxay ka dhici doontaa xafiiskaaga doorashada maxaliga ah, ama ayadoo la adeegsanaayo cod bixinta lagu diro boostada**
- **Waxaa loogu talagalay shaqsiyaadka aan sida kale u codeyn Karin**
- **Cod bixiyaasha codka ku dhiibanaaya boostada waa inay warqadooda cod bixinta codsadaan waqti hore, maadaama waqti ay qaadato in la helo**
- **Waa inay soo celiyaan boqshada cod bixinta kahor Maalinta Doorashada**
- **Waxaa la heli karaa sida ugu dhaqsiyaha badan marka la gaaro waqtiga doorashada illaa Maalinta Doorashada (muddo 28-maalmood ah)**

**Ka codso warqada codbixinta boostada lagu diro bartaan oonleenka elections.ab.ca ama wac 1-877-422-8683.**

# SI TOOS AH OO SHAQSI AH U CODEYNTA

## *Si toos ah oo shaqsi ah u codeynta*

Hawsha cod dhiibashada waxaa loo maraa tallaabooyinkaan soo socda:

1) Marka aad timaado, waxaad la kulmi doontaa sarkaal doorashada oo xaqiijin doona diiwaangelintaada

2) Haddii horey aad isku diiwaangelisay, sarkaalka doorashada wuxuu kuu gudbin doonaa goob cod bixin oo furan

3) Markaas kadib waxaad u baahan doontaa inaad dhiibto aqoonsigaaga si aad u cadeyso magacaaga iyo ciwaanka si aad u hesho warqada cod bixinta

4) Aad oo dib ka mar shaashada la isku qariyo. Ku calaamadee warqadaada cod bixinta “X” ama buuxi goobaabinta ku xigta musharaxa aad dooneyso inaad u codeyso.

5) Usoo celi warqada cod bixinta sarkaalka doorashada, ku dhex rid sanduuqa lagu rido warqada cod bixinta, kadibna dabaaldeg!

## *Waxaan sameeyay qalad…*

Haddii aad sameysay qalad, fadlan la hadal qofka ku siiyay warqadaada cod bixinta. Wuxuu ku siin karaa warqad kale oo cod bixin.

## *Sir ahaanshaha*

Cod bixintaadu waa sir. Illaa inaad u baahato caawimaad maahee, qofna ha tusin qaabka aad u codeysay. Haka qaadin sawir hana ku faafin interneetka warqadaada cod bixinta.



# KU CODEYNTA BOOSTO

## *Ku codeynta Boosto*

Nidaamka ku codeynta boostada waxaa lagu saleeyaa tallaabooyinkaan soo socda:

1) Codso boqshada cod bixintaada waqti hore kana codso bartaan elections.ab.ca

2) Ku hel boqshada cod bixintaada boostada

3) Ku qor magaca musharaxa ama xisbiga aad dooneyso inaad u codeyso warqada cod bixinta
*(Musharixiinta waxaa laga heli karaa elections.ab.ca)*

4) Buuxi oo saxiix foomkaaga xaqiijinta oo nuqul ka bixi Aqoonsigaaga

5) U diyaari boqshada inaad soo celiso

6) Boostada dib ugu soo dir kahor Maalinta Cod bixinta



Codso ooh el Warqada Cod bixinta

Codee

Buuxi Foomamka oo ku qor Aqoonsigaaga

Boqshada

Kusoo celi Boostada

# FUDUDEYNTA

**Waxaan bixinaa dookhyo badan oo aan kaaga caawinayno inaad codeyso:**



**Soo qaado Aaladaada gaarka ah**
si aan oga caawino dadka araga naafada ah inay arkaan warqada cod bixinta



**Qalin qori aad U wayn**
si shaqsiyaadka loo siiyo hab ka caawinaaya inay si raaxo leh u calaamadeeyaan warqadooda cod bixinta




**Qaabka Cod Bixinta**
si dadka araga naafada ka ah looga caawi-yo qaabka ay u qarin lahaayeen sirtooda



**Aalada Gacanta ee Wax Lagu soo Dhaweeyo**
si looga caawiyo dadka araga dhibaatada ka qaba inay si waadix ah u arkaan qoraalka



**Heerka Helida**
si loo hormariyo helida goobta cod bixinta



**Caawinta Cod bixiyaha**
si loo siiyo caawimaad ama loogu oggolaado inuu caawimaad ka helo saaxiib uu ku kalsoon yahay

Suite 100, 11510 Kingsway NW
Edmonton, Alberta T5G 2Y5

Lambarka Bilaashka ah: 310-0000 | Taleefoonka: 1-877-422-VOTE (8683)
www.elections.ab.ca | info@elections.ab.ca

2023